

Heshiiska qoraalka dhexmaray iskii-usameeye iyo ururka Laanqayrta Cas

Anigu markii xilkii iskii-usameeye ahaanta an gudanaayo, waxaan tixraaci doona mabadii'da saldhigga u ah ururka Laanqayrta Cas.

Anigu markii xilkii iskii-usameeye ahaanta an gudanaayo, waxaan tixraaci doona siyaasada iskii-usameeyaha Laanqayrta Cas dalka Iswiidan u dejisan.

Anigu iyo madaxa kretsen/madaxa iskii-usameeyaha* waxaan ku heshiinay qodobada hawlgalka (eeg tilaamida hawlgalka).

Anigu waxaan daahid la'aan madaxa kretsen/madaxa iskii-usameeyaha wargelin doona, haddii an ku talo jiro hakinta ama joojinta hawlgalkii iskii-usameeye ahaanta.

Saxiixayga heshiiska qoraalkan waxaan ku ballanqaadi doona in an tixgelin doono sirta xirfada.

Anigu waxaan ka warqaba in xilkii iskii-usameeye ahaanta an ururka ka haystay layga ciribtiri doono haddii an tixgelin qodobada qoraalka heshiiska ku qoran.

Xajinta sirta xirfada ee Laanqayrta Cas

Iskii-usameeyaha wuxuu la kulmi doona dadyoow taageero Laanqayrta Cas ka hela, ama ka qaybgala dhaqdhaqaaqida Laanqayrta Cas ee kala duwan. Waa dadyoow sababo kala diwan darrood, u baahan taageeradaada iyo taageerada iskii-usameeyaha kale. Taasoo u suurtagelineyso in xaalad-noololeedkooda ay ku sugan yihiin wax ka beddelaan oo ay wanaajiyaan.

Markii dadyoowgaas aad la kulmayso waxay ku muujinyaaan in ay kalsooni kugu qabaan, waxayna ku siinayaan masawirka xaalad-shaqsiyeedka ay ku sugan yihiin. Haddaba waxaa lagamaarmaan ah oo aad muhim u ah, in kalsoonidii iskii-usameeye ahaanta lagu siiyay, aadan marna ama si kasta ba ha ahaate cid kale ugu sheekayn. Wax alle wixii hawlihii Laanqayrta Cas aad ku ogaatay, marna qof kale ma wargelin kartid. Xitaa haddii hawalha iskii-usameeye ahaan Laanqayrta Cas isaga tagtid.

Goobta iyo taariikhda

Saxiixa Iskii-usameeyaha
Saxiix

Saxiixa madaxa Iskii-usameeyaha
Madaxa Iskii-usameeyaha **kretsen**

Mas'uulka krets

Lifaaqyada: Siyaasadda iskii-usameeyaha Laanqayrta Cas dalka Iswiidan, Qoraal taageersho ah ku saabsan dhaqdhaqaaqid kasta, Tilmaanta hawlgalka

*) Xaaladaha qaarkood iskii-usameeyaha waxaa hogaamiyo hawlwadeneeyada xilka ka helay Goleha dhexe ee ururka.

Saldhigga mabda'a Laanqayrta Cas

Saldhigga mabda'a Laanqayrta Cas iyo sida anaga an wax u qiimayno waa isku mid. Waa saldhigga iskuhaaya urukayga oo idil. Taasoo iskii-usameeye kasta waajib ku ah, in uu tixraaco haddii uu doonaayo in uu hab firfircoon dhaqdhaqaaqida ugu hawlgallo. Waa arrin ku salaysan mabaadii' tiradooda ah toddoba, labada ugu horreeysa waa ujeedadayda, waxaa ku xiga laba kale oo tilmaamaya habka an adeegsanno, saddexda ku xiga na waxay ku saabsan yihiin urukayga.

Insaaniyadda

Hawlgalyada Laanqayrta Cas waxay ku salaysan yihiin kahortagga dhibaataada aadenaha. Ujeedada waxay tahay badbaadinta noolasha, caafimaadka iyo ku dadaalka nabadda.

Eex la'aansho

Anaga dadyoowga u ma soo-dowaynno hadba diinta qofka u aaminsan yahay, qollada u ka tirsan yahay, jinsiyadiisa ama aragtidiisa siyaasadeed, ee wa isku kayga mid. Dhammaan falalka cunsuriyeenta ku salaysan waanu ka soo horjeedna. Anagu waxaan ku dadaalna jiritaanka kala duwanaanshada, kaasoo urukayga ku hawlgalo. Dhammaan dadyoowga isku aragtida annu nahay waanu soo-dhowayna.

Dhexdhexaadnimo

Markii iskahorimaadyo ay jirto haddii ururuka Laanqayrta Cas usan marna dhinac u hiilin, kalsoonida ballaaran ee ururka samafalka loo qabo marna waxyeelimayso. Anagu waxaan had iyo jeer la jirna qofka rayidka ah.

Madaxbanaanimo

Waxaan nahay urur madaxbanaan oo xur ah. Waxaan la wada-shaqayn karna dowlad iyo hey'ado, waa haddii wada-shaqayntaasi ay waafaqsan tahay mabaadii'dayda saldhiga ag.

Iskii-usameeye

Dhaqdhaqaaqaydayda waxay ku salaysan yihiin hawlgalyada iskii-usameeyeyaasha.

Waaxda

Dalka kasta waxaan ku leenahay hal waax oo keliya, waxaase ka hawlgalna dalal tiro badan.

Xad la'aansho

Laamaha Laanqayrta Cas oo idil hab gacan furan ayee isu gargaaran. Laamaha waxaa waajib ku ah in ay is-caawiyaan, xaqna way isku leeyihiin in ay is-taakuleyaan.